



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Oktoobar 19, 2021-ka

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo RV, Hawl wadaagayaasha iyo Daryeel Bixiyayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS), iyo Keith Ozols, Agaasimaha, Tababarka Dhaqan celinta (VR)

Ujeedada: Si wadajir ah u wada shaqeynaya

Qayb muhiim ah oo ka mid ah qorshaha Employment First waa xaqiijinta in dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) ay yeeshaan taageerooyinka lagama maarmaanka u ah helitaanka shaqada bulshada. Wada shaqeynta kooxdu waxay muhiim u tahay dadaalkani: La taliyayaasha Tababarka Dhaqan celinta, Isku duwayaasha Adeegyada, Wakiilada Shakhsiyeed iyo Daryeel Bixiyayaasha ayaa si wada jir ah uga shaqeeya waxa u danta ah qofka iyo hadafyadooda shaqo.

Cudurka baahsan ee COVID-19 ayaa nidaamyadeena culeys u saaray siyaabo aynaan weligeen is lahayn waa suurtagal. Iyada oo VR iyo xafiisyada maamulka kiisku ay si dhakhso ah ugu gudbeen/wareegeen dhanka adeegyada meesha fog laga qabto iyo internet-ka, daryeel bixiyayaasha waxaa soo wajahday shaqaale yaraan daran. In ka badan sidii hore, dadka aanu u adeegno waxay inooga baahan yihiin in aanu si wada jir ah u wada shaqeyno oo ka taageerno hadafyadooda shaqo.

Kulankeeni dhanka internet-ka 'webinar' ee Bisha Wacyi gelinta Shaqaaleysiinta Naafada ee Qaranka waxaanu mar kale ku iftiiminay sida ay shaqadu muhiim ugu tahay dadka aanu u adeegno. Dad badan oo qaba I/DD ayaa muujiyey sida ay argagaxeen markii ay noqotay in ay joojiyaan shaqada ka dib cudurkii baahsanaa ee xiray meherado badan oo ganacsi iyo sida ay ugu farxeen in ay ku soo laabtaan shaqada. Hal xubin, ayaa isaga oo tilmaamaya waqtigii uusan shaqeynaynin, sheegay, "Markii u horreysay waxay u ekayd fasax madadaalo leh, balse markaa ka dib

waxaan dareemay in ay naftaydu wax yara carootay sababta oo ah in aanan awoodin in aan wax ku biiriyo bulshada!”

Waa in aanu tani u wada dhanahay oo maskaxda ku haynaa xudunta hadafkeena: ka caawinta dadka reer Oregon ee naafada ah in ay helaan shaqada bulshada oo ay gaaraan hadafyadooda.

Fadlan naftaada daryeel waanad ku mahadsan tahay shaqada aad maalin kasta qabato si aad u taageerto dadka reer Oregon qaba I/DD.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Keith Ozols  
Agaasimaha  
Tababarka Dhaqan celinta

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).